

# Raadinta xubin qoyska ka tirsan oo luntay

Laanqayrta Cas waxay xubnaha qoyska ee kala lumay ka caawisaa in ay is-helaan islana xiriiraan. Guddiga Laanqayrta ee caalamiga ah (ICRC) waxay isku-dubbariddaa hawlaha baadigoobka ah marka ay dhacaan masiibooyinka dabiiciga ah, iska hor-imaadyo iyo guuritaanka. ICRC waxay sannad kasta samaysaa kumannaan baafinta dadka ah oo cusub.

Ururada caalimiga ah ee Laanqayrta iyo Bisha Cas ee dunida dacalladeeda kala jooga ayaa ka qaybqaata raadinta xubnaha qoyska ee lumay. Laanqayrta Cas ee Finland waa qayb ka mid ah shabakaddan caalamiga ah.

Baafinta dadka waxaa looga baaraandegaa xafiiska dhexe ee Laanta Qayrta Cas ee Finland. Adeeggu waa mid lagu kalsoonaan karo macluumaa dyada shahsiyadeedna waxaa looga baaraandegaya si ammaan ah. Marka laga baaraandego baafinta dadka ayaa waxaa loo sii diraya guddiga caalamiga ah ee Laanqayrta Cas. Laanqayrta Cas ee Finland waxay marka lagu jiro marxaladaha kala duwan la xiriiraysaa qofka ehelkiisa raadinaya.

## Sida ayaad u samaynaysaa baafinta dadka

### 1. Buuxi foomka baafinta dadka.

Waxaa foomka laga helyaa cinwaanka [punainenristi.fi/hae-apua-ja-tukea/kadonneiden-loytämiseen/henkilotiedustelu-kadonneen-loytämiseksi](http://punainenristi.fi/hae-apua-ja-tukea/kadonneiden-loytämiseen/henkilotiedustelu-kadonneen-loytämiseksi)

Waxaa foomka buuxin kara ehelka ama mas'uulkiisa/wakiilkisa.

Waxaad boggan ka heleysaa tilmaamo iyo foomam ku qoran luqado badan.

### 2. Ugu dir foomka oo saxiiyan qaab elektroonig ah cinwaanka [tracing@redcross.fi](mailto:tracing@redcross.fi) ama boostada cinwaankeedu yahay PL 168, 00141 Helsinki

### 3. Sug xiriirka ay Laanqayrta Cas ee Finland kula soo samaynayo.

## Raadinta loo kaashado sawirka

Guddiga caalamiga ah ee Laanqayrta Cas waxay maamulaan bogag internetka ah oo dadku ka helyaan fursad ay ku raadiyaan xubnaha qoyskooda ee lumay.

Bogga waxaa laga helaa cinwaanka [www.tracetheface.org](http://www.tracetheface.org)

Waxaa bogga lagu baahinayaa sawirka qofka wax raadinaya oo kaliya waxaana lagu sheegayaa dadka uu raadinayo. Qofku la raadinayo wuxuu noqon karaa tusaale ahaan hooyo, abaayo, cunug ama qoys. Macluumaadka shahsiyadeed ee dadka lama daabacayo.

### Sidan wax u qabo:

1. Waxaad xubnaha qoyskaaga ka raadin kartaa qaybta sawirada lagu kaydiyo. Haddii aad aqoonsato qofka sawirka ka muuqda, la xiriir Laanqayrta Cas. Laanqayrta Cas ayaa macluumaadka u gudbinaysa qofka sawirka ka muuqda.
2. Haddii aad doonayso in aad sawirkaada ku daabacdo bogga, la xiriir Laanqayrta Cas.

### Macluumaad dheeraad ah

Kala xiriir ugu horreyn su'aalaha ku saabsan baadigoobka dadka, xafiiska dhexe ee Laanqaryta Cas ee Finland.

Iambarka xiriirinta, 020 701 2000 (maalmaha shaqada, saacadda u dhexeysa 8.30–16.00)  
[tracing@redcross.fi](mailto:tracing@redcross.fi)